

FARQIGA U DHEXEeya TE TIRITI O WAITANGI EE MAORI IYO DUKUMEENTIGA INGIRIISIGA

Boggani wuxuu muujinayaa qodobbada ugu muhiimsan ee dukumeenti kasta

	TE TIRITI O WAITANGI	DUKUMEENTIGA INGIRIISIGA
QODOBKA KOOWAAD	Hogaamiyayaasha Maori ayaa siinaya boqorada Ingiriiska waligeed xaqa ay u leeyihiin in ay gudoomiye ku yeeshaan dhulkooda.	Hogaamiyayaasha Maori ayaa siinaya boqorada madax banaanida New Zealand.
QODOBKA LABAAD	Boqoradu waxay ogolaatay in Maori ay ilaashadaan madax banaanidooda iyo madax banaanida dhulkooda oo dhan iyo wax kasta oo iyaga muhiim u ah. Hogaamiyayaasha Maori waxay u ogolaadeen boqorada inay haysato qaybo dhul qiimo lagu heshiiyey hadii mulkiiluhu rabo inuu bixiyo.	Boqoraddu waxay dammaanad qaadaysaa dhammaan xuquuqda Maori ee dhulka, kaymaha iyo kalluumaysiga. Haddii Maori ay rabaan inay iibiyaan dhulkooda, way ka iibin doonaan oo keliya boqoradda.
QODOBKA SADEXAAD	Boqoraddu waxay daryeeli doontaa dadka Maori waxayna siin doontaa xuquuq la mid ah tan dadka Ingiriiska.	Boqoraddu waxay ilaalin doontaa Maori waxayna siin doontaa xuquuq la mid ah tan mowadinka Ingiriiska.
QODOBKA AFARAAD (BALLANQAADKA HADALKA)	Guddoomiyuhu waxa uu ballan qaaday in uu ilaalinayo dhaqanka Maori iyo dhammaan diimaha New Zealand.	

MIDKEE AYAA DHAB AHAANTII AH HESHIISKA?

TE TIRITI O WAITANGI	DUKUMEENTIGA INGIRIISIGA
Oo ay saxeexeen in ka badan 500 oo hoggaamiye Maori ah iyo guddoomiyaha Ingiriiska oo wakiil ka ah boqoradda.	Waxaa saxiixay 39 hogaamiye oo Maori ah.
Kani waa heshiiska uu taageeray sharciga caalamiga ah. Sharciga caalamiga ahi waxa uu mudnaanta siinayaa qoraalka maori marka loo eego xeer loo yaqaan <i>contra proferentem</i> . Taas macneheedu waxa weeye marka qandaraasku aanu caddayn, waa in loo fasiraa dhinacii qandaraaska bixiyay.	Kani waa heshiiskii Ingiriisku rabay. Dawladda New Zealand waxay awooddeeda ku salaysay noocan.
Heshiiskani waxa uu aqoonsaday madaxbanaanida Maori ee New Zealand.	Dukumeentigani waxa uu sheegayaa in Maori ay siisay dawladdnimada boqoradda.

